Sahayda ubadka muslimkaa

زَادُ المُسْلِمِ الصَّغِيرِ

Waxaa diyaariyay
Dr. Cabdi Shakuur Macallim Cabdi faarax
(Abuu Caisha)

Waxaa tarjumay
Lulu Cabdi Casiis Xasan

SAHAYDA UBADKA MUSLIMKA

HORDHACA TARJUMAHA

Alle ayey mahad oo idil u sugnaatay. Allihii na abuuray, na hanuuniyey oo na arzaaqay. ii na suuragaliyey inaan buuggaan la wadaago bulshawaynta soomaaliyeed. **Naxariis iyo nabadgalyo nabigeena suuban dushiisa ha ahaato.**

Intaas kadib waxaan mahad u jeedinayaa waalidkayga kuwaas oo barbaarintayda ku soo dadaalay, gaar ahaan hooyaday **Mihiyo Cali Mohamed** oo aan aad u jeclahay.

waxaan u mahad celinayaa cidkasta oo igu garabsiisey kitaabkan tarjumiddiisa iyo soo saaristiisa.

Buuggan magaciisa waa **SAHAYDA UBADKA MUSLIMKA .** Waxaa jecleestay inaan kitaabkan u tarjumo ummadda somaaliyeed ubadkooda ee soo kacaya ee ku nool dunida iyo daafaha gaar ahaan ubadka ku nool goobaha aan laheen waxbarashada islaamiga.
Kitaabkan wuxuu u samaysan yahay qaab **su'aalo iyo jawaaba** ah kuwaas oo laga soo aruuriyey Caqiido, Fiqi, Siiro, Adkaar iyo Akhlaaqda ubadka muslimka.
Si ay sarre ugu qaadaan waalidkood wacyigooda diimeed iyo asaasiyaadka diinta.

Waxaan ugu dambayn halkan uga ducaynayaa diktoor **Cabdishakuur Macalin Cabdi Faarah** oo ah qoraaga buugga inuu ilaahay ajar fara badan ha ka siiyo abalkiisana janna ha ugu baddalo.

Waxaa illaahay ka rajeenayaa inuu ka dhigo kitaabkan mid aan ajar ku mutaysto iyo raalli ahaanshaha illaahay.

<u>Tarjumaha Buugga:</u> Lulu Abdiaziz Hassan



HORDHACA QORAAGA

Mahad illaahay baa iska leh, waxaana ka marag kacaya in uusan jirin illaah kale oon Eebe ahayn, wadaajina uma sugnaan, waxaana marag ka ahay Muxammad inuu yahay addoonkiisii iyo Rasuulkiisii, sayidka kuwii hore iyo kuwii dambe.

Intaas kadib:

Barbaarinta ubadka iyo korintooda waa ammaano qorteena ku sugan, waxaana dusheena waajib ku ah inaan gudano ammaanadaas. tani waa risaala fudud oo u habaysan qaab su'aalo iyo jawaabo ah taas oo ugu talagalay ubadka hadda wax baranaya ee ku jira dugsiyada qur'aanka iyo xanaanada ubadka. Si ay ugu fududaato in ay bartaan aasaaska diinta islaamka una xifdiyaan qaab kooban oo fudud. Waxaan ku tijaabiyay tiro badan oo macalimiin ah oo ka mid ah macallimiinta dugsiyada Qur'aanka ee magaalada Muqdisho ardaydooda, wayna u fududaatay xifdiga. waxaa kale u sahlanaaday in ay tartanada diinta ku galaan waana idin ku dhiiragalinayaa in la faafiyo .

Ilaaahay waxaan waydiisanayaa inuu igu anfaco adduun iyo aakhiraba

Qoraaga buuga: dr. Abdishakuur macalin cabdi farah

العقيدة

س١ – مَنْ رَبُّكَ ؟

ج – رَبِّيَ اللّٰهُ عَزَّ وَجَلَّ

S_1 - Rabbigaa waa kuma?

J- Rabbigayga waa illaahay caza wa jal.

س٢ – مَنْ نَبِيُّكَ ؟

ج – نَبِيِّي مُحَمَّدٌ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ

S_2 - Waa kuma nabigaaga?

J - Nabigayga waa Muxamed ***naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato***

س٣ – مَا دِيْنُكَ ؟

ج – دِيْنِيَ الإِسْلامُ

S_3 - Waa tee diintaada?

J - Diintayda waa diinta islaamka

س٤ – لِمَا ذَا خَلَقَنَا اللَّهُ تَعَالَى ؟

ج – لِتَوْحِيْدِهِ وَعِبَادَتِهِ وَحْدَهُ

S_4 - Muxuu illaahay noo abuuray?

J - Wuxuu noo abuuray in aan kaligiis caabudno cibaadadana u gaar yeelno.

س٥ – بِمَ عَرَفْتَ اللهَ ؟

ج – بِآيَاتِهِ وَمَخْلُوقَاتِهِ ، كَاللَّيْلِ وَالنَّهَارِ ، وَالْشَّمْسِ وَالْقَمَرِ

S_5 - Rabigaaga maxaa ku garanaysaa?

J - Waxaan ku garanayaa illaaahay aayaatkiisa oo ay ka mid tahay, habeenka, maalinta, qorraxda, dayaxa iyo waxkasta oo uu abuuray.

س٦ – مَا أَعْظَمُ وَاجِبٍ عَلَيْنَا ؟

ج – تَوْحِيدُ اللهِ تَعَالَي

S_6 - Waa maxay waajibka ugu wayn ee ilaahay nagu leeyahay?

J - Waa inaan Allaah kaligiis caabudno.

س٧ – مَا أَعْظَمُ الذَّنْبِ عِنْدَ اللَّهِ تَعَالَى ؟

ج – الشرْكُ بِاللَّهِ تَعَالَى

S_7 - Waa maxay dambiga ugu wayn ilaahay agtiisa?

J - Waa in illaahaygii sarreeyay wax lala wadaajiyo.

س٨ – كَمْ مَرَاتِبُ الدِّيْنِ ، وَمَا هِيَ ؟

ج – مَرَاتِبُ الدِّينِ ثَلاثَةٌ هِيَ : الإِسْلامُ وَالإِيمَانُ وَالإِحْسَانُ

S_8 - Waa meeqa darajaatka diinta islaamka, maxayna kala yihiin?

J - Darajaatka diinta islaamka waa seddex: islaam, iimaan iyo ixsaan.

س٩ – مَا هُوَ الإِسْلَامُ ؟

ج – الاسْتِسْلامُ لِلَّهِ بِالتَّوْحِيدِ ، وَالإِنْقِيَادُ لَهُ بِالطَّاعَةِ ، وَالْبَرَاءَةُ مِنَ الشِّرْكِ وَأَهْلِهِ

S9 - Waa maxay islaam?

J - Waa in aad isku dhiibtid illaahay adoo kaliyeelaya, una hoggaansantid daacaatkiisa, kana fogaatid shirkiga iyo dadka sameeya.

س١٠ – كَمْ أَرْكَانُ الإِسْلَامِ وَمَا هِيَ ؟

ج – أَرْكَانُ الإِسْلامِ خَمْسَةٌ ، وَهِيَ

١ شَهَادَةُ أَنْ لا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ ، وَأَنَّ مُحَمَّداً رَّسُوْلُ اللَّهِ

٢ وَإِقَامُ الصَّلاةِ

٣ وَإِيْتَاءُ الْزَّكَاةِ.

٤ وَصَوْمُ رَمَضَانَ

٥ وَحَجُّ الْبَيْتِ مَنِ اسْتَطَاعَ إِلَيْهِ سَبِيلا

S10 - Waa meeqo tiirarka islaamka maxayna kala yihiin?

J - Tiirarka islaamka waa shan waxayna kala yihiin:

1. **Labada Shahaado oo lala yimaado: taas oo ah qiritaanka in illaahay maahane aanu illaah kale jirin, muxamed na uu rasuulkii illaahay yahay.**

2. **Salaadda oo la ooggo (la toosiyo)**

3. Zakada oo la bixiyo

4. Soonka bisha ramadaan oo la soomo

5. Xajka oo la tago qofkii awooda

س١١ – مَأْ مَعْنَى (لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ) ؟

ج – مَعْنَاهَا : لا مَعبُودَ بِحَقٍ إِلَّا اللَّهُ

S_{11} - Waa maxay macnaha laa illaaha illallaah?

J - Macnaheeda waa: illaah xaq lagu caabudo majiro Allaah ma ahanee.

س١٢ – مَا مَعْنَى (مُحَمَّدٌ رَّسُولُ اللَّهِ) ؟

ج – مَعْنَاهَا : أَنَّ اللَّهَ أَرْسَلَهُ إِلَيْنَا لِطَاعَتِهِ وَاتِّبَاعِ شَرْعِ

S_{12} - Waa maxay macnaha Muxamadu rasuulullaah?

J - Macnaheeda waxaa waaye: illaahay ayaa noo soo diray xaggeena saan u addeecno una raacno jidkiisa.

س١٣ – مَأْ عَمُودُ الدِّينِ ؟

ج – عَمُودُ الدِّينِ الصَّلَاةُ

S_{13} - Waa maxaay diinta tiirka ay ku taagantahay?

J - Diinta tiirka ay ku taagantahay waa salaadda.

س١٤ – مَا جَزَاءُ مَنْ أَطَاعَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ ؟

ج – دُخُولُ الجَنَّةِ

S_{14} - Waa maxay abaalmarinta uu mudanayo qofka illaahay iyo rasuulkiisa addeeeca?

J - Abaalmarintiisu waa in uu jannada ku galo

س١٥ – مَا جَزَاءُ مَنْ جَحَدَ وَعَصَى اللَّهَ وَرَسُولَهُ ؟

ج – دُخُولُ النَّارِ

S_{15} - Waa maxay abaalmarinta uu mudanayo qofka illaahay iyo rasuulkiisa ku caasiya?

J - Abaalmarintiisu waa in uu naarta ku galo

س١٦ – مَا هُوَ الْإِيْمَانُ ؟

ج – الاعْتِقَادُ بالقَلْبِ ، وَالْقَولُ بِاللسَانِ ، وَالْعَمَلُ بِالجَوارح

S_{16} - Waa maxay iimaanka?

J - Waa qalbiga oo caqiidada lagu rumeeyo, carabkana laga dhaho iyo cibaadada oo jirka laga sameeyo

س١٧ – بِمَ يَزِيدُ الإِيْمَانُ ؟ وَبِمَ يَنقُصُ ؟

ج – يَزِيدُ بِالطَّاعَةِ ، وَيَنْقُصُ بِالمَعْصِيَةِ

S_{17} - Muxuu ku ziyaadaa ku na yaraadaa iimaanka?

J - Wuxuu ku ziyaadaa iimaanka illaahay oo la addeeco, wuxuuna ku yaraadaa xumaanta oo la sameeyo.

س١٨ – كَمْ أَرْكَانُ الْإِيْمَانِ ، وَمَا هِيَ ؟

ج – أَرْكَانُ الإِيمَانِ سِتَّةٌ ، وَهِيَ

١ أَنْ تُؤْمِنَ بِاللَّهِ

٢ وَمَلائِكَتِهِ

٣ وَكُتُبِهِ

٤ وَرُسُلِهِ

٥ وَاليَوْمِ الآخِرِ

٦ وَبِالقَدَرِ خَيْرِهِ وَشَرِّهِ

S_{18} - Waa imisa tiirarka iimaanka maxayna kala yihiin?

J - Tiirarka imaanka waa lix waxayna kala yihiin:

1. inaad illaahay rumayso

2. malaa'igtiisa rumayso

3. kutubtiisa rumayso

4. **rusushiisa rumayso**

5. Maalinka aakhiro rumayso

6. **Qadarka khayrkiisa iyo sharkiisa rumayso**

س١٩ – مَا هُوَ الإِحْسَانُ ؟

ج – أَنْ تَعْبُدَ اللهَ كَأَنَّكَ تَرَاهُ ، فَإِنْ لَمْ تَكُنْ تَرَاهُ فَإِنَّهُ يَرَاكَ

S_{19} - Waa maxay ixsaanka?

J - **Illaahay inaa u caabudo sidii adigoo arkaya, haddii aadan ahayn mid arkaya ilaaahay, asaga ayaa ku arkaya.**

س٢٠ – أَذْكُرْ خَمْسَةٌ مِنْ أَسْمَاءِ اللَّهِ الْحُسْنَىٰ

ج – (السَّمِيعُ، الْبَصِيرُ، الْعَلِيمُ ، المَلِكُ، القُدُّوسُ)

S_{20} - Sheeg shan magac oo illaahay magacyadiisa wanaagsan ka mid ah?

J - Alle maqlid badan, alle wax kasta arka, alle cilmi badan, alle boqor ah , alle waxkasta ka hufan.

س٢١ – مِمَّ خَلَقَ اللَّهُ الْمَلَائِكَةَ ؟

ج – خَلَقَ اللَّهُ المَلائكَةَ مِن نُورٍ

S_{21} - Muxuu illaahay ka abuuray malaa'igta?

J - Wuxuu illaahay ka abuuray malaa'igta nuur.

س٢٢ – أَذْكُرْ أَرْبَعَةً مِنَ الْمَلَائِكَةِ

ج – ١ جِبْرِيلُ عَلَيْهِ السَّلامُ

٢ مِيكَائِيلُ عَلَيْهِ السَّلامُ

٣ . إِسْرَافِيلُ عَلَيْهِ السَّلامُ

٤ مَلَكُ المَوْتِ عَلَيْهِ السَّلامُ

S_{22} - Sheeg afar kamid ah malaa'igta magacyadooda?

J - 1. **Jibriil.** **Nabadgalyo korkiisa ha ahaato**

2. **Mikaa'iil** **Nabadgalyo korkiisa ha ahaato**

3. **Israafiil.** **Nabadgalyo korkiisa ha ahaato**

4. **Malakul mowt.** **Nabadgalyo korkiisa ha ahaato**

س٢٢ – مِمَّ خَلَقَ اللَّهُ الْجِنَّ ؟

ج – خَلَقَ اللّٰهُ الجِنَّ مِنْ نَارٍ

S_{23} - Muxuu illaahay ka abuuray jinka?

J - Wuxuu illaahay jinka ka abuuray dab.

س٢٤ – ما هي الكُتُبُ الْمُنَزَّلَةُ ؟ وَعَلَى مَنْ أُنزِلَتْ ؟

ج – ١ التَّوْرَاةُ عَلَى مُوسَى عَلَيْهِ السَّلامُ

٢ الإِنجِيلُ عَلَى عِيْسَى عَلَيْهِ السَّلامُ

٣ الزَّبُورُ عَلَى دَاوُدَ عَلَيْهِ السَّلامُ

٤ الفُرْقَانُ عَلَى نَبِيْنَا مُحَمَّدٍ صَى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّم

S_{24} - Maxay yihiin kutubada illaahay uu soo dajiyey yuuse ku soo dajiyey?

J - 1. **Towraat, waxaa lagu soo dajiyey nabi muuse,** ***Nabadgalyo korkiisa ha ahaato***

2. **Injiil, waxaa lagu soo dajiyey nabi ciise.** ***Nabadgalyo korkiisa ha ahaato***

3. **Zabuur, waxaa lagu soo dajiyey nabi daa'uud.** ***Nabadgalyo korkiisa ha ahaato***

4. **Furqaan, waxaa lagu soo dajiyey nabigeena muxamed.**

Naxariis iyo nabad galyo korkiiso ha ahaato

س٢٥ – مَنْ هُمْ أُولُو الْعَزْمِ مِنَ الرُّسُلِ ؟

ج – ١ نُوحٌ عَلَيْهِ السَّلامُ

٢ إِبْرَاهِيمُ عَلَيْهِ السَّلامُ

٣ مُوسَى عَلَيْهِ السَّلامُ

٤ عِيسَى عَلَيْهِ السَّلامُ

٥ مُحَمَّدٌ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ

S_{25} - Waa kuma nabiyada ulul-cazmiga ah ee rususha ilaahay kamid ka ah?

J - 1. **Nabi nuux** ***Nabadgalyo korkiisa ha ahaato***

2. **Nabi ibraahim** ***Nabadgalyo korkiisa ha ahaato***

3. **Nabi muusa** ***Nabadgalyo korkiisa ha ahaato***

4. **Nabi ciise** ***Nabadgalyo korkiisa ha ahaato***

5. **Nabi muxamed** ***Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahato***

س٢٦ – مَنْ هُوَ أَوَّلُ الأَنْبِيَاءِ وَأَبُو البَشَرِ ؟

ج – نَبِيُّ اللَّهِ آدَمُ عَلَيْهِ السَّلامُ

S_{26} - Waa kuma nabigii ugu horreeyey nabiyada iyo aabaha bani'aadanka?

J - Waa nabigii illaahay ee Adam ***Nabadgalyo korkiisa ha ahaato***

س٢٧ – مِمَّ خَلَقَ اللهُ آدَمَ عَلَيْهِ السَّلَامُ ؟

ج – خَلَقَ اللَّهُ آدَمَ مِنْ طِينٍ

S_{27} - Muxuu illaahay ka abuuray nabi Adam Nabadgalyo korkiisa ha ahaato?

J - Wuxuu illaahay ka abuuray nabi adam ciid

س٢٨ – مَنْ هُوَ النَّبِيُّ الَّذِي وُلِدَ بِدُونِ أَبٍ ؟

ج – عِيْسَى بْنُ مَرْيَمَ عَلَيْهِ السَّلَامُ

S_{28} - Sheeg nabigii la dhalay aabo la'aan?

J - Waa nabi ciise oo ah ina maryama ***Nabadgalyo korkiisa ha ahaato***

س٢٩ – مَنْ هُوَ كَلِيْمُ اللَّهِ ؟

ج – مُوسَى عَلَيْهِ السَّلَامُ

S_{29} - Sheeg nabiguu illaahay si toos ah u la hadlay?

J - Waa nabi muusa. ***Nabadgalyo korkiisa ha ahaato***

س٣٠ – مَنْ هُوَ أَبُو الْأَنْبِيَاءِ وَخَلِيلُ اللَّهِ ؟

ج – إِبْرَاهِيمُ عَلَيْهِ السَّلَامُ

S_{30} - Waa kuma aabaha nabiyada iyo khaliilkii illaahay?

J- Waa nabi ibraahim ***Nabadgalyo korkiisa ha ahaato***

س٣١ – مَنْ هُوَ خَاتِمُ الْأَنْبِيَاءِ وَأَفْضَلُ الرُّسُلِ ؟

ج – نَبِيَّنَا مُحَمَّدٌ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ

S_{31} - Waa kuma nabigii ugu dambeeyey nabiyada uguna fadli badnaa?

J - Waa nabigeena muxamed. ***Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato***

س٣٢ – كَمْ نَبِيًّا ذُكِرَ فِي الْقُرْآنِ الْكَرِيم ؟

ج – خَمْسَةٌ وَعِشْرُونَ نَبِيًّا

S_{32} - Meeqa nabi ayaa qur'aanka lagu sheegay?

J - Waxaa lagu sheegay qur'aanka 25 nabi.

س٣٣ – عَرِّفِ الْعِبَادَةَ ؟

ج – كُلُّ مَا يُحِبُّهُ اللَّهُ وَيَرْضَاهُ مِنَ الأَقْوَالِ وَالأَفْعَالِ وَالأَعْمَالِ الظَّاهِرَةِ وَالبَاطِنَةِ

S33 - Waa maxay cibaado?

J - Waa wax kasta uu illaahay jecel yahay raallina ka yahay hadal ahaan, ficil ahaan iyo camalka tiisa muuqata iyo midda qarsoonba.

س٣٤ – مَا هِيَ الطَّهَارَةُ ؟

ج – رَفْعُ الحَدَثِ ، وَإِزَالَةُ النَّجَاسَةِ

S34 - Maxaa la dhahaa dahaara?

J - In layska kor yeelo xadathka iyo in layska nadiifiyo najaasada.

س٣٥ – مَا هُوَ الاسْتِنْجَاءُ ؟

ج – تَطْهِيرُ السَّبِيلَيْنِ بِالمَاءِ

S35 - waa maxay istinja'?

J - waa inaad ku daahiriso biyo labada waddo ee ka soo baxaan saxarada iyo kaadida.

س٣٦ – مَا هِيَ فُرُوضُ الْوُضُوْءِ ؟

ج – فُرُوْضُ الْوُضُوْءِ سِتَّةٌ وَهِيَ :

١ النِّيَّةُ

٢ وغَسْلُ الوَجْهِ كَاملاً

٣ وَغَسْلُ اليَدَيْنِ إِلَى المِرْفَقَينِ

٤ ومَسْحُ الرَّأْسِ

٥ وغَسْلُ القَدَمَينِ إِلَى الْكَعْبَينِ

٦ والترتيب

S_{36} - Waa maxay waajibaadka waysada?

J - Waajibaadka waysada waa lix waxayna kala yihiin:

1. **Inaad niyeysato waysada**
2. **Inaad dhaqdo wajiga oo dhan**
3. **Inaad dhaqdo gacmaha ilaa iyo xusulada**
4. **Inaad masaxdo madaxa**
5. **Inaad dhaqdo lugaha ilaa iyo anqowga**
6. **Inaad u kala hormariso sidee u kala horeeyaan**

س٣٧ – مَا هِيَ نَوَاقِضُ الوُضُوءِ ؟

ج – نَوَاقِضُ الوُضُوءِ هِيَ :

١ الخَارِجُ مِنَ السَّبِيْلَينِ كَالبَوْلِ وَالْغَائِطِ وَالرِّيحِ

٢ وَزَوَالُ العَقْلِ بِنَوْمٍ أَوْ غَيْرِهِ

٣ وَمَس الفَرْجِ بِبَاطِنِ الكَفْ

٤ وَلَمْسُ جَسَدِ المَرْأَةِ الأجنبية

S_{37} - Waa maxay waxyaabaha waysada jabiya?

J - Waxyaabaha waysada jabiya waa:

1. **Wixii ka soo baxa labaddii wado sida kaadida,saxarada iyo neefta.**
2. **Qofka oo caqligiisa ku waayo hurdo iyo wixii lamid ah**
3. **Calaacasha oo lagu taabto xubnaha taranka**
4. **Inaad taabato haweenay ajnabi kaa ah jirkeeda.**

س٣٨ ــ مَا هُوَ التَّيَمُّمُ ؟

ج – مَسْحُ الوَجْهِ وَاليَدَيْنِ بِتُرَابٍ طَاهِرٍ بَدَلا مِنَ الوُضُوءِ أَو الغُسل

S_{38} - Waa maxay booraysiga ama gabagabaysiga?

J - Waa inaad wajiga iyo gacmaha ku masaxdo ciid daahir ah ayadoo kuu galaysa booska marka aad heli waydo biyo.

س٣٩ ــ مَا هُوَ تَعْرِيْفُ الْصَّلَاةِ ؟

ج – أَفْعَالُ وَأَقْوَالٌ مَخصُوصَةٌ مُفْتَتَحَةٌ بِالتَّكْبِير و مُخْتَتَمَةٌ بِالتَسْلِيمِ

S_{39} - Waa maxay qeexidda salaadda?

J - Waa ficilo iyo hadalo gaar ah oo lagu la yimaado salaadda gudaheeda taas oo lagu furfurto takbiirta (allaahu akbar) loogana baxo salaam naqsiga.

س٤٠ ــ كَمْ صَلَاةَ تَجِبُ عَلَى الْمُسْلِمِ فِي الْيَوْمِ وَاللَّيْلَةِ ، وَكَمْ رَكَعَاتُهَا ؟

ج – الصَّلَوَاتُ المَفْرُوْضَةُ عَلَى المُسْلِمِ خَمْسٌ ، وَهِيَ :

١ الْفَجْرُ (رَكْعَتَانِ)

٢ وَالْظُّهْرُ (أَرْبَعُ رَكَعَاتٍ)

٣ وَالْعَصْرُ (أَرْبَعُ رَكَعَاتٍ)

٤ وَالمَغْرِبُ (ثَلاثُ رَكَعَاتٍ)

٥ وَالْعِشَاءُ (أَرْبَعُ رَكَعَاتٍ)

S_{40} - Meeq salaadood ayaa qofka muslimka ah lagu waajibiyey in uu tukado habeen iyo maalin, imisa rakco ayey salaad kasta leedahay?

J - Salaadaha waajibka ah waa shan waxay na kala yihiin:

1. **Salaad subax (laba rakco)**
2. **Salaad duhur (afar rakco)**
3. **Salaad casar (afar rakco)**
4. **Salaad maqrib (seddex rakco)**
5. **Salaad cishe (afar rakco)**

س٤١ – مَا هِيَ شُرُوْطُ الْصَّلَاةِ ؟

ج – شُرُوطُ الصَّلاةِ هِيَ :

١ الإِسْلامُ

٢ وَالْعَقْلُ

٣ وَالْتَّمْمِيزُ

٤ وَرَفْعُ الحَدَثِ

٥ وَإِزَالَةُ النَّجَاسَةِ

٦ وَسَتْرُ الْعَوْرَةِ

٧ وَدُخُولُ الْوَقْتِ

٨ وَاسْتِقْبَالُ الْقِبْلَةِ

S_{41} - Waa maxay shuruudaha salaadda?

J - Shuuruudaha salaada waa:

1. **Inaad islaam tahay**
2. **Inaad caqli leedahay**
3. **Inaad wax kala garan karto**
4. **Inaad xadathka iska kor yeesho**
5. **Inaad iska nadiifisid najaasada**
6. **Inaad cawrada asturto**
7. **Waqtiga salaadda in uu soo galo**
8. **Qiblada inaad qaabisho**

س٤٢ – مَا هِيَ أَرْكَانُ الصَّلَاةِ ؟

ج – أَرْكَانُ الْصَّلاةِ أَرْبَعَةَ عَشَرَ ، وَهِيَ :

١ النِّيَةُ

٢ وَالقِيَامُ لِلْقَادِرِ

٣ وَتَكْبِيرَةُ الإِحرام

٤ وَقِرَاءَةُ الفَاتِحَة

٥ وَالرُّكُوعُ

٦ وَالرَّفْعُ مِنَ الرُّكُوعِ

٧ وَالسُّجُودُ

٨ وَالجُلُوسُ بَينَ السَجْدَتَين

٩ وَالطُّمَأْنِينَةُ فِي جَمِيعِ الأَفْعَالِ

١٠ وَالتَّشَهدُ الأَخِيرُ

١١ وَالجُلُوسُ فِيهِ

١٢ وَالصَّلاةُ عَلَى النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ

١٣ وَالسَّلامُ

١٤ وَتَرْتِيبُ الأَرْكَانِ

S_{42} - Waa maxay tiirarka salaadda?

J - Tiirarka salaada waa afar iyo toban waxayna kala yihiin:

1. **Inaad niyeysato salaadda**
2. **Inaad istaagto haddaad awooddo**
3. **Inaad takbiirsato (allaahu akbar)**
4. **Inaad aqriso suratul faatixa**
5. **Inaad rukuucdo**
6. **Inaad ka soo laabato rukuucda**
7. **Inaad sujuuddo**
8. **Inaad fadhiisato labada sujuudood dhexdooda**

9. **Inaad ku xasisho dhammaan ficilada**
10. **inaad ataxiyaatka u dambeeya aqriso**
11. **inaad fadhiisato**
12. **Inaad ku sallido nabiga** ***naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha aahato***
13. **Inaad ka baxdo salaadda**
14. **Inaad u kala hormariso sidee u kala horeeyaan**

س٤٣ – مَاذَا نَقُولُ فِي التَّشَهدِ ؟

ج – التَّحِيَّاتُ الْمُبَارَكَاتُ الصَّلَوَاتُ الطَّيِّبَاتُ لِلَّهِ ، السَّلامُ عَلَيْكَ أَيُّهَا النَّبِيُّ وَرَحْمَةُ اللهِ وَبَرَكَاتُهُ السَّلامُ عَلَيْنَا وَعَلَى عِبَادِ اللَّهِ الصَّالِحِينَ ، أَشْهَدُ أَنْ لا إِلَهَ إِلَّا اللهُ ، وَأَشْهَدُ أَنَّ مُحَمَّدًا رَسُوْلُ اللهِ

S_{43} - Maxaan akhrineena ataxiyaatka gudihiisa?

J - Salaamo, barakayaalo, salaado(naxariiso) iyo wanaagyo illaahay ayay usugnaadeen, nabadgalyo korkaada ha ahaato nabiyahow, naxariistii illaahay iyo barakooyinkiisa ha ahaadeen korkaaga. Salaan korkanaga ha ahaato iyo korka addoomaha illaahay ee wanaagsan, waxaan qirayaa in uusan jirin illaahay xaq lagu caabudo, Allaah mooye, waxaan kaloo qirayaa in uu muxammadna yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa ***naxariis iyo naba galyo korkiisa ha aahato***

س٤٤ – كَيْفَ نُصَلِّي عَلَى النَّبِيِّ بَعْدَ التَشَهدِ ؟

ج – اللَّهُمَّ صَلِّ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى آلِ مُحَمَّدٍ كَمَا صَلَّيْتَ عَلَى إِبْرَاهِيمَ وَعَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ ، وَبَارِكْ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى آلِ مُحَمَّدٍ كَمَا بَارَكْتَ عَلَى إِبْرَاهِيمَ وَعَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ فِي الْعَالَمِينَ إِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ

S_{44} - Sideen ugu sallinaa nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha aahato* ataxiyaatka markaan dhammeeno kadib?

J - Allow u naxariiso muxamed iyo ehelkiisa sidaad ugu naxariisatay ibraahim iyo ehelkiisa, illaahow barakee nabi muxammed iyo ehelkiisa sidaad u barakaysay nabi ibraahim iyo ehelkiisa koonkan dhexdiisa, adigu waxaa tahay mahad badane sharaf badan.

س٤٥ – مَا هِيَ مُبْطِلَاتُ الصَّلَاةِ ؟

ج – مُبطِلاتُ الصَّلاةِ هِيَ :

١ الأكل أو الشُّرْبُ عَمْداً

٢ وَالكَلامُ عَمْداً

٣ وَالحَرَكَاتُ الكَثِيرَةُ عَمْداً

٤ وَتَرْكُ شَرْطٍ أَوْ رُكْنٍ مِنَ الصَّلاةِ عَمْداً

٥ وَانْتَقاضُ الوُضُوء

S_{45} - Waa maxay waxyaabaha buriya salaadda ?

J - Waxayaabaha salaadda buriya waa:

1. **Inaad kas wax u cunto ama aad u cabto**
2. **Inaad salaadda kas ugu dhex hadasho**

3. **Inaad dhaqdhaqaaq badan ku samayso salaadda gudaheeda si kas ah**
4. **Inaad ka tagto shardi ama tiir tiirarka salaadda kamid ah adoo og**
5. **Inay waysada kaa jabto**

س٤٦ – مَا هُوَ تَعْرِيْفُ الزَّكَاةِ ؟

ج – حَقٌّ وَاجِبٌ فِي المَالِ يُعْطَى لِطَائِفَةٍ مَخْصُوصَةٍ فِي وَقْتٍ مَخصُوص

S_{46} - Waa maxay qeexidda zakada?

J - Waa xaq waajib ku ah xoolahaada lana siiyo dad gaar ah waqti gaar ahna la bixiyo.

س٤٧ – مَا هُوَ تَعْرِيفُ الصَّوْمِ ؟

ج – الإمساك عَنِ المُفْطِرَاتِ مِنْ طُلُوعِ الفَجْرِ إِلَى غُرُوبِ الشَّمْس مَعَ النية

S_{47} - Waa maxay qeexidda soonka?

J - Waa inaad ka fogaataa waxyaabaha soonka buriyo laga bilaabo markuu waaga baryo ilaa ay ka dhacdo qorraxda adoo niyeysanaya inaad soomayso.

س٤٨ – مَا هُوَ تَعْرِيفُ الْحَج ؟

ج – قَصْدُ مَكَةَ لأَداءِ أَعْمَالِ الحَجِّ

S_{48} - Waa maxay qeexidda xajka?

J - Waa inaad u qasado aaditaanka Makka adoo gudanaya acmaasha xajka.


السِّيرَةُ النَّبَوِيَّةُ

س٤٩ – مَا اسْمُ نَبِيِّنَا صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ؟

ج – مُحَمَّدُ بْنُ عَبْدِ اللَّهِ بِنِ عَبْدِ الْمُطَّلِبِ بنِ هَاشِمٍ ، وهَاشِمٌ مِنْ قُرَيْشٍ ، وَقُرَيْشُ مِنَ الْعَرَبِ

S49 - Sheeg magaca nabigeena muxamed *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*?

J - Muxamed binu cabdullaahi binu cabdil mudalib binu haashim, haashim wuxuu ka ahaa quraysh, qurayshna wuxuu ka sii ahaa carab.

س٥٠ – مَتَى وُلِدَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ؟

ج – عَامَ الْفِيلِ

S50 - Gooorma ayuu dhashay Nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*?

J - Sanadkii maroodiga ayuu dhashay .

س٥١ – مَنْ هِيَ أُمُّ النَّبِيِّ صَى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّم ؟

ج – آمِنَةُ بِنْتُ وَهْبٍ

S51 - Waa tuma hooyada nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*?

J - Waxaa la dhahaa Aamina bintu wahab

س٥٢ – أَيْنَ وُلِدَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ؟

ج – فِي مَكَّةَ المَكَرَّمَةِ

S52 - Xaggee ayuu ku dhashay nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*?

J - Wuxuu ku dhashay Makka dii sharafta lahayd

س٥٣ – كَمْ كَانَ عُمْرُ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ عِنْدَمَا مَاتَتْ أُمُّهُ ؟

ج – سِتَّ سَنَوَاتٍ

S53 - Markay hooyadiis dhimanaysay nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaate* meeqa jir ayuu ahaa?

J - Wuxuu jiray lix sano

س٥٤ – مَنْ الَّذِي كَفَلَ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ بَعْدَ وَفَاةِ أُمِّهِ ؟

ج – جَدُّهُ عَبْدُ المُطَّلِبِ ، ثُمَّ عَمُّهُ أَبُو طَالِبٍ

S54 - Markay hooyadiis dhimatay nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaate* yaa kafaalo qaaday?

J - Waxaa kafaalo qaaday awoogiis cabdul mudalib kadibna adeerkiis abuu daalib.

س٥٥ – مَنْ هِيَ مُرْضِعَةُ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ؟

ج – حَلِيمَةُ السَّعْدِيَةُ

S55 - Waa qoftee hawaynaydii naas-nuujisay nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*?

J - Waxay ahayd xaliimatu sacdiya

س٥٦ – بِمَ عَمِلَ النَّبِيُّ صَلَّ اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فِي صِغَرِهِ ؟

ج – بالرغي وَالتَّجَارَةِ

S56 - Muxuu ka shaqeen jiray markuu yaraa nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*?

J - Wuxu ka shaqeen jiray xoolo raac iyo ganacsi

س٥٧ – مَنْ هِيَ الْزَّوْجَةُ الْأُوْلَىٰ لِلنَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ؟

ج – خَدِيْجَةُ بِنْتُ خُوَيْلِدٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهَا

S57 - Waa tuma xaaskiisa koowaad nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*?

J - Waxay ahayd khadiija bintu khuwaylid. Allaha ka raalli noqdo

س٥٨ – اذْكُرْ أَوْلَادَ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ الْذُكُورَ وَالْإِنَاثَ ؟

ج – لِذَّكُورُ : إِبْرَاهِيمُ ، وَالْقَاسِمُ ، وَعَبْدُ اللَّهِ

وَالإِناثُ : فَاطِمَةُ ، وَرُقَيَّةٌ ، وَزَيْنَبُ ، وَأُمُّ كَلْثُوْمٍ

S58 - Sheeg caruurta nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato* lab iyo dhadigba?

J - Lab: Ibraahim, Qaasim. Iyo Abdullaahi

Dhaddig: Faadima, Ruqayya, Zaynab, Ummu kalthuum

س٥٩ – كَمْ كَانَ عُمْرُ النَّبِيِّ صَلَّ اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ عِنْدَمَا نَزَلَ عَلَيْهِ الْوَحْيُ ؟

ج – أَرْبَعِينَ عَامًا

S59 - Meeqa jir ayuu ahaa marku waxyiga ku so dagaaye nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato?*

J - Wuxuu ahaa afartan jir.

س٦٠ – مَا اسْمُ الْمَلَكِ الَّذِيْ كَانَ يَنْزِلُ بِالْوَحْيِ عَلَىٰ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ؟

ج – جِبْرِيلُ عَلَيْهِ السَّلامُ

S60 - Sheeg magaca malagii ku soo dajiyey waxyiga nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*?

J - Waa jibriil *nabadgalyo korkiisa ha ahaato*

س٦١ – مَا أَوَّلُ مَا نَزَلَ مِنَ الْقُرْآنِ الكَرِيمِ ؟

ج – أَوَّلُ مَا نَزَلَ مِنَ القُرآن : ﴿ أَقْرَأَ بِاسْمِ رَبِّكَ الَّذِي خَلَقَ ﴾ ﴿خَلَقَ الْإِنسَانَ مِنْ عَلَقٍ ﴾ ﴿ أَقْرَأْ وَرَبُّكَ الْأَكْرَمُ* ﴿ الَّذِي عَلَّمَ بِالْقَلَمِ ﴾ ﴿ عَلَّمَ الْإِنسَنَ مَا لَمْ يَعْلَمْ ﴾ { العلق : ١ ـ ٥ }

S61 - Sheeg wixii ugu horreeye ee soo daga qur’aanka xaggiisa?

J - Wixii ugu horreeyee soo daga waa shanta aayad ee ugu horreyso suuratu calaq .

س٦٢ – كَمْ كَانَتْ مُدَّةُ الدَّعْوَةِ سِرًّا ؟

ج – ثَلاثَ سَنَوَاتٍ

S_{62} - Imisa sano ayay dacwada qarsoodi ahayd?

J - Waxay ahayd seddex sano.

س٦٣ – إِلَى أَيْنَ كَانَتِ الْهَجْرَةُ الأُولَى لِلصَّحَابَةِ ؟

ج – إِلَى الحَبَشَةِ.

S_{63} - Xaggee u hijroodeen saxaabada hijradoodii koowaad?

J - Waxay u hijroodeen dalkii xabashida

س٦٤ – مَا اسْمُ الْصَّحَابِيِّ الَّذِيْ كَانَ سَبَبًا فِي إِسْلَامِ أَهْلِ الْمَدِينَةِ؟

ج – مُصْعَبُ بْنُ عُمَيرٍ رَضِوَاللَّهُ عَنْهُ .

S_{64} - Sheeg magaca saxaabigii sababta u ahaa in ay islaamaan reer madiina?

J - Muscab binu cumayr *allaha ka raalli noqdo*.

س٦٥ – إِلَى أَيْنَ هَاجَرَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَأَصْحَابُهُ ؟

ج – إِلَي المَدِينَةِ.

S_{65} - Xaggee ayey u hijroodeen saxaabada iyo nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*?

J - Waxay u wada hijroodeen magaalada Madiina

س٦٦ ــ مَا اسْمُ أَوَّلِ مَسْجِدٍ بَنَاهُ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فِي الْمَدِينَةِ ؟

ج – مَسْجِدُ قُبَاءَ.

S_{66} - Sheeg magaca masjidkii ugu horreeyey ee nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato* *uu dhisay*?

J - Waxaa la dhahaa Masjidu qubaa

س٦٧ ــ كَمْ حَجَّةً حَجَّ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ؟

ج – حَجَّةً وَاحِدَةً وَهِيَ حَجَّةُ الْوَدَاعِ

S_{67} - Imisa xaj ayuu xajiyay nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*?

J - Hal xaj, waana xajkii u dambeeyey

س٦٨ ــ كَمْ سَنَةٌ اسْتَمَرَّتْ دَعْوَةُ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ؟

ج – ثَلاثَةٌ وَعِشْرِينَ عَامًا

S_{68} - Meeqa sano ayuu waday diinta faafinteeda nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*?

J - Wuxuu waday seddex iyo labaatan sano

س٦٩ ــ أَيْنَ تُوُفِّيَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ؟

ج – فِي الْمَدِينَةِ الْمُنَوَّرَ.

S_{69} - Halkee ayuu ku dhintay nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*?

J - Wuxuu ku dhintay madina

س٧٠ – كَمْ كَانَ عُمْرُ النَّبِيِّ صَلَ اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ عِنْدَ وَفَأْتِهِ ؟

ج – ثَلاثًا وَستِّينَ سَنَةٌ.

S_{70} - Meeqa jir ayuu ahaa Markuu dhimanayay nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*?

J - Wuxuu jiray lixdan iyo seddex (63) sano

س٧١ – أَذْكُرْ سَبْعًا مِنْ زَوْجَاتِ النَّبِيِّ صل اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أُمَّهَاتِ الْمُؤْمِنِينَ ؟

ج – ١ خَدِيجَةُ بِنْتُ خُوَيْلِد رَضَيَ اللّٰهُ عَنْهَا

٢ عَائِشَةُ بِنْتُ أَبِي بَكْرٍ رَضَيَ اللّٰهُ عَنْهَا

٣ سَوْدَةُ بِنْتُ زَمْعَةَ رَضَيَ اللّٰهُ عَنْهَا

٤ حَفْصَةُ بِنْتُ عُمَرَ رَضَيَ اللّٰهُ عَنْهَا

٥ زَيْنَبُ بِنْتُ خُزَيْمَةَ رَضَيَ اللّٰهُ عَنْهَا

٦ زَيْنَبُ بِنْتُ جَحْشٍ رَضَيَ اللّٰهُ عَنْهَا

٧ أُمُّ سَلَمَةَ هِنْدٌ بِنْتُ أَبِي أُمَيَّةَ رَضَيَ اللّٰهُ عَنْهَا

S_{71} - Sheeg toddoba ka mid ah xaasaskii nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato* ahna hooyooyinka mu'miniinta?

J - 1. Khadiija bintu khuwaylid *allaha ka raali noqdo.*

2. Caaisha bintu abii bakar *allaha ka raali noqdo.*

3. Sowda bintu zamca *allaha ka raali noqdo*

4. Xafsa bintu cumar *allaha ka raali noqdo*

5. Zaynab bintu khuzayma *allaha ka raali noqdo*

6. Zaynab bintu jaxshi *allaha ka raali noqdo*

7. Umu salama hinda bintu abii umayya *allaha ka raali noqdo*

س٧٢ – أُذْكُرْ خَمْسًا مِنْ غَزَوَاتِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ؟

ج – ١ غَزْوَةُ بَدْرٍ .

٢ غَزْوَةُ أُحدٍ .

٣ غَزْوَةُ الأَحْزَاب .

٤ غَزْوَةُ خَيْبَرَ .

٥ غَزْوَةُ فَتْحِ مَكَّةَ

S_{72} - Sheeg shan duullaan uu ka qayb galay nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*?

J - 1. Duullaankii badar

2. Duullaankii uxud

3. Duullaankii axzaab

4. Duullaankii khaybar

5. Duullaankii furashada Makka

س٧٣ – مَا هُوَ حَقُّ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ عَلَيْنَا ؟

ج – مَحَبَّتُهُ ، وَتَصْدِيقُهُ ، وَاتِّبَاعُهُ ، وَالْصَّلاةُ عَلَيْهِ

S_{73} - Waa maxay xaqa uu nagu leeyahay nabiga *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*?

J - In la jeclaado, la rumeeyo,j idkiisii la raaco, laguna salliyo.

س٧٤ – مَنْ هُمُ الْخُلَفَاءُ الرَّاشِدُوْنَ ؟

ج – ١ أَبُو بَكْرِ الصِّدِّيقُ رَضِيَ اللّٰهُ عَنْهُ

٢ عُمَرُ بْنُ الخَطَّابِ رَضِيَ اللّٰهُ عَنْهُ

٣ عُثْمَانُ بْنُ عَفَّانٍ رَضِيَ اللّٰهُ عَنْهُ

٤ عَلِيُّ بْنُ أَبِي طَالِبٍ رَضِيَ اللّٰهُ عَنْهُ

S_{74} - Waa kuwee khulafaa'u raashidiin?

J - khulafaa'u raashiidin ta waa:

1. **Abuu bakaru siddiiq.** ***allaha ka raali noqdo.***
2. **Cumar binu khadaab.** ***allaha ka raali noqdo.***
3. **Cuthmaan binu caffaan.** ***allaha ka raali noqdo***
4. **Cali binu abii daalib.** ***allaha ka raali noqdo***

س٧٥ – مَنْ هُوَ أَوَّلُ مَنْ أَسْلَمَ مِنَ الرِّجَالِ ؟

ج – أَبُو بَكْرِ الصِّدِّيقُ رَضِيَ اللّٰهُ عَنْهُ

S_{75} - Waa kuma qofkii ugu horreeyey ee soo islaamay xagga ragga?

J - Waa Abuu bakaru siddiiq ***allaha ka raali noqdo***

س٧٦ – مَنْ هُوَ أَوَّلُ مَنْ آمَنَ مِنَ الْصِّبْيَانِ ؟

ج – عَلِيُّ بْنُ أَبِي طَالِبٍ رَضِيَ اللّٰهُ عَنْهُ

S_{76} - Waa kuma qofkii ugu horreeyey ee soo islaamay xaga caruurta?

J - Waa Cali binu abii daalib ***allaha ka raali noqdo.***

س٧٧ – مَنْ هُوَ ذُو النُّورَيْن ؟

ج – عُثْمَانُ بْنُ عَفَّانٍ رَضِيَ اللّٰهُ عَنْهُ

S_{77} - Waa kuma kan labada nuur u saaxiibka ah?

J - Waa Cuthmaan binu caffaan ***allaha ka raali noqdo.***

س٧٨ – من هُوَ سَيِّدُ الشُّهَدَاءِ ؟

ج – حَمْزَةُ بْنُ عَبْدِ الْمُطَّلِبِ رَضِيَ اللّٰهُ عَنْهُ

S_{78} - Waa kuma shuhadada sayidkoodii?

J - Waa Xamza binu cabdil mudalib ***allaha ka raali noqdo***

س٧٩ – مَنْ هُوَ سَيْفُ اللَّهِ الْمَسْلُوْلُ ؟

ج – خَالِدُ بْنُ الْوَلِيدِ رَضِيَ اللّٰهُ عَنْهُ

S_{79} - Waa kuma seeftii illaahay oo galka la'ayd?

J - Waa Khaalid binu waliid ***allaha ka raali noqdo***

س٨٠ – مَنْ هِيَ أَوَّلُ شَهِيدَةٍ فِي الإِسْلَامِ ؟

ج – سُمَيَّةُ بِنْتُ الخَيَّاطِ رَضِيَ اللّٰهُ عَنْهَا

S_{80} - Waa tuma gabadhii ugu horraysay ee shahiiday?

J - Waa Sumaya bintu khayaad ***allaha ka raali noqdo***

س٨١ – مَنْ هُوَ مُؤَذِّنُ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ؟

ج – بِلالُ بْنُ رَبَاحٍ رَضِيَ اللّٰهُ عَنْهُ

S_{81} - Waa kuma mu'adinkii nabiga ***naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato*** **?**

J - Waa bilaal binu rabaax ***allaha ka raali noqdo***


الأذكار والأدعية

س٨٢ ـ مَا ذَا نَقُوْلُ قَبْلَ النَّوْمِ ؟

ج – بِاسْمِكَ اللَّهُمَّ أَمُوتُ وَأَحْيَا

S82 - Maxaan akhrinaynaa intaanan seexan ka hor?

J - Magacaaga ayaan allow ku dhimanayaa kuna noolaanayaa

س٨٣ ـ مَا ذَا نَقُوْلُ بَعْدَ الِاسْتِيْقَاظِ مِنَ النَّوْمِ ؟

ج – الحَمْدُ للهِ الَّذِي أَحْيَانَا بَعْدَ مَا أَمَاتَنَا وَإِلَيْهِ النُّشُورِ

S83 - Maxaan oranaynaa marka hurdada laga soo kaco?

J- Mahad waxaa iska leh allihii na nooleeyay intuu na oofsaday kadib, xaggiisuuna ahaaday isa soo saarka maalinka qiyaamaha.

س٨٤ ـ مَا ذَا نَقُولُ عِنْدَ دُخُولِ الحَمَّامِ ؟

ج – اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنَ الخُبُثِ وَالخَبَائِثِ

S84 - Maxaan oranaynaa markaan galayno suuliga?

J - Allow waxaan kaa magangalayaa sheydaanka kiisa lab ka ah iyo kiisa dhaddigga.

س٨٥ ـ مَا ذَا نَقُولُ عِنْدَ الْخُرُوجِ مِنَ الحَمامِ ؟

ج – غُفْرَانَكَ

S85 - Maxaan oranaynaa markaan ka soo baxayno suuliga?

J - **Allow dambi dhaafkaaga ayaan ku waydiisanayaa**

س٨٦ ــ مَا ذَا نَقُوْلُ قَبْلَ الوُضُوءِ ؟

ج – بِسْمِ اللهِ.

S_{86} - Maxaan oranaynaa waysada ka hor?

J - **Magaca illaahay ayaan ku bilaabayaa.**

س٨٧ ــ مَا ذَا نَقُوْلُ بَعْدَ الْفَرَاغَ مِنَ الْوُضُوءِ ؟

ج – أَشْهَدُ أَنْ لا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَحْدَهُ لا شَرِيكَ لَهُ ، وَأَشْهَدُ أَنَّ مُحَمَّداً عَبْدُهُ وَرَسُولُهُ ، اللَّهُمَّ اجْعَلْنِي مِنَ التَّوَّابِينَ وَاجْعَلْنِي مِنَ الْمُتَطَهِّرِينَ

S_{87} - Maxaan oranaynaa markaan waysada dhammayno?

J - **Waxaan qirayaa inuusan jirin illaah xaq lagu caabudo allaah mooyee, cid wax la wadaagtana majirto waxaan qirayaa oo kale in nabi muxamed *naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee* uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa. Allow iga yeel kuwa towbad keenka badan igana dhig kuwa is daahiriya.**

س٨٨ ــ مَا هُوَ دُعَاءُ الخُرُوجِ مِنَ الْمَنْزِلِ ؟

ج – بِسْمِ اللَّهِ تَوَكَّلْتُ عَلَى اللهِ ، وَلا حَوْلَ وَلا قُوَّةَ إِلا بِاللَّهِ

S_{88} - Waa maxay ducada la akhriyo marka guriga laga baxaayo?

J - **Magaca illaahay ayaan alle ku tala saartay, xeelad iyo awoodna ilaahay ayey usugnaadeen.**

س٨٩ ــ مَاذَا نَقُولُ عِنْدَ دُخُولِ المَسْجِدِ ؟

ج – اللهُمَّ افْتَحْ لِي أَبْوَابَ رَحْمَتِكَ

S89 - Maxaan oranaynaa markaan masaajidka galayno?

J - Allow ii fur albaabada naxariistaada.

س٩٠ ــ مَا ذَا نَقُولُ فِي الرُّكُوعِ ؟

ج – سُبْحَانَ رَبِّيَ الْعَظِيمِ (ثَلاثًا)

S90 - Maxaan akhrinayna rukuucda dhexdeeda?

J - Waxaa xumaan oo dhan ka hufan rabbigaygii waynaa (seddex jeer)

س٩١ ــ مَا ذَا نَقُولُ بَعْدَ الرَّفْعِ مِنَ الرُّكُوعِ ؟

ج – سَمِعَ اللَّهُ لَمَنْ حَمِدَهُ ، رَبَّنَا لَكَ الحَمْدُ مِلْءَ السَّمَاوَاتِ وَمِلْءَ الأَرْضِ ، وَمِلْءَ مَا شِئْتَ مِنْ شَيْءٍ بَعْدُ .

S91 - Maxaan dhahaynaa markaan ka soo toosno rukuucda?

J - Illaahay wuu maqlay qofkii mahdiyay, allow waxaan kuugu mahdinayaa in dhan mugga cirarka iyo dhulka iyo mugga wax kasta oo aad doontid.

س٩٢ ــ مَا ذَا نَقُولُ فِي السُّجُودِ ؟

ج – سُبْحَانَ رَبِّيَ الأَعْلَى (ثَلاثًا)

S92 - Maxaan oranaynaa sujuudda dhexdeeda?

J - Waxaa xumaan oo dhan ka hufan rabbigaygii sarreeyay (seddex jeer)

س٩٣ ــ مَا ذَا نَقُولُ بَعْدَ الرَّفْعِ مِنَ الْسُّجُودِ ؟

ج – رَبِّ اغْفِرْ لِي وَارْحَمْنِي ، وَاجْبُرْنِي، وَارْفَعْنِي ، وَارْزُقْنِي وَاهْدِنِي

S93 - Maxaan oranaynaa marka aan ka soo kacno sujuudda?

J - Allow ii dambi dhaaf, oo ii naxariiso, oo i kab, oo i dalacsii, oo i arzaaq, oo i hanuuni.

س٩٤ ــ مَاذَا نَقُولُ عِنْدَ الخُرُوجِ مِنَ المَسْجِدِ ؟

ج – اللهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ مِنْ فَضْلِكَ .

S94 - Maxaan oranaynaa markaan masaajidka ka soo baxayno?

J - Allow waxaan ku waydiisanayaa fadligaada

س٩٥ ــ مَا الْأَذْكَارُ بَعْدَ الْسَّلَامِ مِنَ الْصَّلَاةِ ؟

ج – أَسْتَغْفِرُ اللهَ (ثَلاثَ مَرَّاتٍ) ، اللَّهُمَّ أَنْتَ السَّلامُ ، وَمِنْكَ السَّلامُ ، تَبَارَكْتَ يَا ذَا الجَلالِ وَالإِكْرَامِ .

– سُبْحَانَ اللَّهِ وَالحَمْدُ للَّهِ وَاللَّهُ أَكْبَرِ (ثَلاثًـا وَثَلاثِينَ مَرَّاتٍ) ، لا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَحْدَهُ لا شَرِيكَ لَهُ ، لَهُ المُلْكُ وَلَهُ الحَمْدُ وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ

– آيةُ الكُرْسِي ، اللَّهُ لا إِلَهَ إِلَّا هُوَ الحَيُّ الْقَيُّومُ لا تَأْخُذُهُ سِنَةٌ وَلا نَوْمٌ لَهُ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الأَرْضِ مَن ذَا الَّذِي يَشْفَعُ عِندَهُ إِلَّا بِإِذْنِهِ يَعْلَمُ مَا بَينَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ وَلا يُحِيطُونَ بِشَيْءٍ مِّنْ عِلْمِهِ إِلَّا بِمَا شَاءَ وَسِعَ كُرْسِيُّهُ

السَّمَوَاتِ وَالأَرْضَ وَلا يَؤُودُهُ حِفْظُهُمَا وَهُوَ الْعَلِيُّ الْعَظِيمُ ﴾{البقرة : ٢٥٤} . وَالْمُعَوِذَاتِ:﴿ قُلْ هُوَ اللَّهُ أَحَدٌ ﴾ ﴿ قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ الْفَلَقِ ﴾ ﴿ قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ النَّاسِ ﴾

S95 - Waa maxay adkaarta la aqriyo salaadda marka laga baxo?

J - Illaahay ayaan dambi dhaaf weydiisanayaa (seddex jeer), allow adigaa nabad ah, xagaagana nabad ayaa ku sugnaatay,waadna baraka badnaatay allihii waynaanta iyo maamuska u saaxiibka ahaayow.

- **Illaahybaa xumaan oo dhan ka hufan, mahaduna illaahay ayay usugnaatay, illaahay baana wayn. (soddon iyo seddex jeer). Illaahay xaq lagu caabudo majiro illaahay kaligii mooyee, cid wax la wadaagtana malaha, waxaana u sugnaaday boqortinimada iyo mahadda, waana midka wax walba awooda.**
- **Aayatul kursiga ayaa ku xigta**
- **Mucawwidaatka aqri oo ah (qul- huwwallaahu), (qul- acuudu birabil falaq), (qul- acuudu birabinnaas).**

س٩٦ – مَا هُوَ دُعَاءُ دُخُولِ المَنْزِلِ ؟

ج – بِسْمِ اللَّهِ وَلَجْنَا ، وَبِسْمِ اللَّهِ خَرَجْنَا ، وَعَلَى اللَّهِ رَبَّنَا تَوَكَّلْنَا ، ثُمَّ يُسَلِّمُ عَلَى أَهْلِهِ .

S96 - Maxaan akhrinayna marka la galayo guriga?

J- **Magac illaahay ayaan ku galnay, magaca illaahayna waan ku baxnay rabbiganagana waan tala saaranay, kadib wuxuu salaami qofka reerkiisa.**

س٩٧ ــ مَا ذَا نَقُولُ قَبْلَ الطَّعَامِ ؟

ج – بِسْمِ اللهِ .

S97 - Maxaan dhahaynaa cuntada ka hor?

J - Magaca ilaahay ayaan ku bilaaabayaa.

س٩٨ ــ مَأْ ذَا نَقُوْلُ بَعْدَ الْفَرَاغِ مِنَ الطَّعَامِ ؟

ج – الحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي أَطْعَمَنِي هَذَا ، ورَزَقَنِيهِ ، مِنْ غَيْرِ حَوْلٍ مِنِّي وَلا قُوَّةٍ

S98 - Maxaan oranaynaa marka la dhammeeyo cuntada?

J - Waxaa mahad leh allihii igu quudiyay quudkan, iguna irzaaqay, iyadoon jirin xeelad iyo awood xaggayga ka ahaatay.

س٩٩ ــ مَاذَا يَقُولُ العَاطِسُ ؟

ج – يَقُولُ : (الحَمْدُ لِلَّهِ) ، فَيُقَالُ لَهُ : (يَرْحَمُكَ اللَّهُ) ، فَيَقُولُ : (يَهْدِيكُمُ اللَّهُ وَيُصْلِحُ بَالَكُمْ) .

S99 - Muxuu oranayaa qofka markuu hindhiso?

J- Wuxuu oronayaa qofka hindhisay mahad illaahay baa leh, waxaa lagu oranayaa qofkaas allaha kuu naxariisto, markii intaas la dhaho isagana ha dhaho illaahay ha idin hanuuniyo, hana hagaajiyo arimihiina.

س١٠٠ ــ مَا ذَا نَقُولُ لِمَنْ صَنَعَ إِلَيْنَا مَعْرُوفًا ؟

ج – جَزَاكَ اللَّهُ خَيْرًا

S_{100} - Maxaad oranaynaa qofka kuu sameeya wax wanaagsan?

J - Ilaahay kheyr hakugu abaalmariyo

س١٠١ – مَاذَا نَقُولُ عِنْدَ الْمَطَرِ وَبَعْدَهُ ؟

ج – نقُولُ عِنْدَ المَطَرِ : (اللَّهُمَّ صَيِّبًا نَافِعًا) ، وَبَعدَ المَطَرِ : (مُطِرْنَا بِفَضْلِ اللَّهِ وَرَحْمَتِهِ)

S_{101} - Maxaan oronaynaa marka uu roob da'ayo iyo kadib?

J - Roobka markuu da'ayo waxaad dhihi: Allow ka dhig roob shubma oo wax anfaca. Roobka kadibna waxaad oran: waxaa nalagugu roobeeyay galladda alle iyo naxariistiisa sababteeda.

س١٠٢ – مَاذَا نَقُولُ عِنْدَ زِيَارَةِ الْمَرِيضِ ؟

ج – أَسْأَلُ اللهَ العَظِيمَ رَبَّ العَرْشِ الْعَظِيمِ أَنْ يَشْفِيَكَ . { سَبْعَ مرَّات}

S_{102} - Maxaan oranaynaa marka bukaan la booqanaayo?

J - Waxaan waydiisanayaa illaahayga weyn, ee ah rabbiga carshiga weyn in uu ku shaafiyo. (todoba mar)

س١٠٣ – مَاذَا نَقُولُ عِنْدَ الْغَضَبِ ؟

ج – أَعُوذُ بِاللَّهِ مِنَ الشَّيْطَانِ الرَّجِيمِ

S_{103} - Maxaan oranaynaa markaan xanaaqno?

J - Waxaan illaahay uga magangalayaa sheydaanka laga dheereeyay naxariista illaahay.

س١٠٤ ــ مَا هُوَ دُعَاءُ الرُّكُوبِ ؟

ج – بِسْمِ اللهِ ، وَالحَمْدُ للَّهِ ، سُبْحَنَ الَّذِي سَخَّرَ لَنَا هَذَا وَمَا كُنَّا لَهُ مُقْرِنِينَ وَإِنَّا إِلَى رَبَّنَا لَمُنقَلِبُونَ **{ الزخرف : ١٣-١٤ }**

S_{104} - Waa maxay ducada safarka?

J - Magaca illaahay ayaan ku bilaabanayaa, mahad alle ayay u sugnaatay, waxaa nasahan eebaha noo sahley gaadiidkan, mana nihin kuwa kara alle la'aantiis. Anagana xagga illaahay ayaan u laabanaynaa.

أخلاق المسلم

س١٠٥ – اذْكُرْ بَعْضًا مِنْ أَخْلَاقِ الْمُسْلِمِ ؟

ج – مِن أَخْلاقِ المسلم :

١ الرَّحْمَةُ.

٢ الْصِّدْقُ وَعَدَمُ الْكَذِبِ.

٣ حُبُّ الْعِلْمِ.

٤ الْعَفْوُ وَالْصَّفْحُ.

٥ إِكْرَامُ الضَّيْفِ

٦ اخْتِرَامُ الجَارِ.

٧ الأَمَانَةُ وَعَدَمُ الخِيَانَةِ.

٨ الصَبْرِ

٩ الطَّهَارَةُ وَالْنَّظَافَةُ

١٠ الابْتِسَامَةُ

١١ إماطة الأذى عَنِ الطَّرِيْقِ

١٢ بِرُّ الْوَالِدَيْنِ.

١٣ الْحَيَاءُ

١٤ مُسَاعَدَةُ الْمُحْتَاجِ

١٥ التَّعَاوُنُ

S_{105} - Sheeg qayb ka mid ah akhlaaqda muslimka?

J - Waxaa kamid ah akhlaaqda muslimka:

1. **Naxariista**
2. **Runta oo la sheego iyo beenta oo laga fogaado**
3. **Cilmiga oo la jeclaado**
4. **Cafinta iyo saamixidda.**
5. **Martida oo la sharfo**
6. **Dariska oo la ixtiraamo**
7. **Ammaanada oo la ilaaliyo iyo khiyaanada oo laga fogaado**
8. **Samirka oo lagu dadaalo**
9. **Nadaafadda iyo dahaarada oo la sameeyo**
10. **Dhoola cadaynta oo la joogteeyo**
11. **Jidka oo wixii dhib ah laga qaado**
12. **Waalidka oo baari loo noqdo**
13. **Xishoodka oo lala yimaado**
14. **Ugargaaridda dadka baahan**
15. **Iskaashiga**

Illaahay khayr oo dhan ha idin waafajiyo.


Sahayda ubadka muslimkaa
زَادُ الْمُسْلِمِ الصَّغِيرِ
Waxaa diyaariyay
Dr. Cabdi Shakuur Macallim Cabdi faarax
(Abuu Caisha)
Waxaa tarjumay
Lulu Cabdi Casiis Xasan
المسلم الصغير